Barnaamijka Horumarinta ardayda Dugsiga Sare (Student Success Program)

Arday walba waxa u wax u barta si gooni ah. Hada waxaa jira habab cusub oo ay uga qeyb geli karaan dugsiga sare iyo ku helaan kreditka ay u baahan yihiin inay ku qalin jibiyaan.

Barnaamijka Horumarinta Ardaydu waxa uu siinayaa ardayda dhowr nooc oo doorashooyin kala duwan ah oo ka caawinaya in ay waxbarashada ka gaaraan heer ka baxsan galaaskii caadiga ahaa. Ardayda Dugsiga Sare waxay:

- Heli doonaan fursado fara badan oo ay ku guulaystaan.
- Dhiiri geliyo iyo ugu fiirsadaan sidii ay wax ku baran lahaayeen.
- Ku raaxaystaan habab fara badan oo ay kredit ku heli karaan.

Ardayda Dugsiyada Sare ee Ontario waxay fursado u helayaan ay ku sameeystaan waayo aragnimadooda ku aadan waxbarashada iyaga quseeysa.

Xirfadaha Waxbarashada sare ee qaaska ah (Specialist High Skills Majors)

Ardayda maskaxda ku haya waxbarasho qaas ah, Xirafadaha Waxbarashada sare ee qaaska ah ayaa siinaya fursad ay ku sameeystaan waxbarashadooda iyagoo la eegaya xirfadooda iyo waxay jecel yihiin. Waxbarasho kasta oo sare waxay ka kooban tahay 8 ilaa 10 fasal, oo qeyb ka ah 30 kredit ee loo baahan yahay si lagu qalin jabiyo. Waxay ardayda ka caawinaysaa inay u diyaar garoobaan shaqooyinka qaaska ah, oo ay ku jiraan soo dhaweeynta iyo safarada, farshaxanka iyo dhaqanka, caafimaadka iyo wanaaga, dhismaha, warshadaha, beeraha iyo dhulka, iyo warbaahinta iyo telnoolajiga isgaarsiinta.

Iskaashiga Balaarsan (Expanded Co-op)

Tabararada shaqada gudahooda ma aha kaliya fursad balaaran oo wax lagu bartee, waa fursad ay ardaydu ku bartaan waxyaabaha ay shaqsi ahaan jecel yihiin iyo awoodooda iyo ku bilaabaan dhisitaanka mustaqbakooda. Sii Balaarinta Iskaashiga arday fara badan ayaa hada waxay fursad u helaan ay ku bartaan waayo aragnimo shaqo oo qiime leh iyagoo isla markaasna helaya kredit, oo ay ku jiraan 2 kredit oo qasab u ah helitaanka shahaadada. Ardaydu waxay fursad u helaan "sii waditaanka" fursadooda shaqo hadii ay u socdaan inay jaamacad dhigtaan ama koleeje, ama shaqo barasho ama goob shaqo.

Maadooyin Lamaano ah (Dual Credits)

Maadooyinka Lamaanaha ah waxa uu ardayga u ogolaada inuu ka qeyb galo tababarka shaqada iyo galaasyada waxbarashada sare weli inta uu dugsiga sare dhiganayo. Fasaladaasna waxaa lagu xisaaba labadaba shahaadada dugsiga sare iyo shahaadada waxbarashada sare, degriiga ama shahaadada shaqo barashada. Waxay u ogolaanaysa ardaygu inuu "isku dayo" kollejka, midaasoo ku fiican kuwa doonaya inay ogaadaan fursadaha ka baxsan dugsiga sare iyo ka faa'iidaysanaya waayo aragnimada kollejka.

Wareega Fasalada 7 – 9

Ardayda dhibaatada ku qaba kala wareejinta dugsiga dhexe ilaa dugsiga sare waxay ka heli karaan u fiirsasho shaqsiyan ah oo dheeraad ah iyo barnaamij lagu eegayo xaalada cusub iyo dhibaatooyinka hor taagan ee waxbarashada dugsiga sare.

Kooxaha Horumarinta Ardaydao

Dugsi kasta oo sare hada waxa uu leeyahay koox u qaabilsan oo ka kooban Maamule, macalimiin iyo lataliye. Kooxdaasi waxay siiyaan u fiirsasho dheeraad ah iyo caawinaad shaqsiyaadka ardayda ah ee u baahan. Kooxdu waxay aqoonsadaan iyo caawiyaan ardayda dhibaataysan, iyagoo siiya fursado fara badan oo ay wax ku baran karaan iyo la socdaan horumarka ardaygaas, sidoo kalena kooxda horumarinta ardaydu waxay la shaqeeysa shaqaalaha iskuulka, waalidiinta iyo bulsho weynta si ay u caawiyaan arday fara badan sidii ay ku baran lahaayeen kreditka loo baahan yahay inay ku qalin jabiyaan.

Fasalada Cusub

Dugsiyadu waxay bixiyaan fasalo cusub oo teknoolajiga iyo waxay ku dareen maadooyin cusub fasaladii waxbarashada teknoolajiga ee horay u jiray. In ka badan 300,000 oo arday ayaa ka faa'iidaystay in ka badan 200 oo fasal oo ah teknoolajiga cusub iyo 500 oo fasal oo la hagaajiyay, oo ay ku jiraan soo dhawaynta, caafimaadka iyo kombuter injinyeering. Ardaydu waxay kaloo ka faa'iidaysan karaan ilaa iyo 50 fasal oo online ah. Fasaladaasu waxay ardayda ka caawiyaan inay fursad u helaan ay ku bartaan maadooyinka ay jecel yihiin iyo ku helaan kreditka ay u baahan yihiin si ay u qalin jibiyaan.

Dhaqanka Horumarka Ardayda

Maamulayaasha iyo macalimiinta gobolka oo dhan waxay helaan tababar ay ku sameeynayaan fikrado cusub iyo habab cusb, oo ka caawinaya ardaydu sidii ay uga qalin jibin lahayeen dugsiga sare. Waxa uu ku dhisan yahay dhaqanka ka filashada sare iyo u fiirsasho shaqsiyan ah iyo xananayn. Markii ay macalimiintu bartaan fursadahaas cusub, waxay ardayda siin doonaan fursado, oo ay ku jiraan waxyaabaha lagu bedelan karo waxbaridii galaaska caadiga ah

Barnaamijka Lighthouse

Barnaamij cusub oo degaanka ah ayaa diyaar u ah ardayda doonaysa caawinaad dheeraad ah iyo u fiirsasho si ay u sii dhigtaan iskuulka iyo ku dhiiri gelinaya kuwa ka tagay iskuulka sidii ay ugu soo noqon lahaayeen. Ardaydu waxay ku aruursadaan kredit iyo barnaamijyo la xariira kollejka.

Si aad wax badan uga ogaato, soo booqo dugsigaada degaanka iyo la hadal maamulahaada. Warbixin kale oo dheeraad ah waxay diyaar ku tahay bogaga Ingriiska iyo Faransiiska ee web sitekaan.

Ontario